



Toronto Community Housing



Waa maxay TAVIS?

- TAVIS waa **Tabaabushaha Dhexgalka ee Ka Hortagga Cabsi Gelinta ee Toronto**, kaas oo ah tabaabushe degdegg ah, ahna tabaabushe yaraynaya cabsida isla markaasna abaabulaya mujtamaca kaas oo ku aaddan inuu hoos u dhigo dunuubta korna u qaado nabadgelyada xaafadaheenna.
- TAVIS waxaa hormuud u ah Adeegga Booliiska Toronto (Toronto Police Services). Waxaana kula midoobay Guriyaynta Mujtamaca ee Toronto (Toronto ommunity Housing) iyo laamaha Magaalada Toronto sida Parks, Dhirta iyo daaqa, iyo Jardiinooyinka, Caafimaadka Bulshada Toronto Horumarinta Bulshada, Dhaqaalaha iyo Maamulka, Xafiiska Iskaashiga ee Toronto iyo kuwa kale.

Sidee bay u shaqaysaa?

- TAVIS waxay ku hawlgasha saddex weji:
 - 1) Saraakiil dheeraad ah ee ka tirsan Booliiska Toronto ayaa loo qoondeeyaa aagagga ay la soo deristay kor u kaca hawlaha cabsida keena.
 - 2) Isla marka xaafaduhu nabadoobaan, waxaa la wadayaa xoojin 'heer -dayactir' oo ay la socoto kordhin saraakiileed, magaalada iyo xubno mujtamaca ka mid ah oo is garabsada, iyo
 - 3) 'Caadiyayan' siin hawlo Booliisayn oo taageero u ah mujtamac baraarugay.
- Qaybta lagama maarmaanka ah ee eeTAVIS waa diyaargaraynta xubnaha mujtamaca. Waxay noqotaa taageerada loogu baahanyahay in loola tacaalo aasaasaka arrimaha sababa denbiyada si adag
- Hirgalka TAVIS kuma salaysna tirada dadka loo xidhay denbiyo, laakiin waxay ku salaysantahay heerka hoos u dhaca denbiyada, hirgelinta is aaminaadda shacabka iyo isku kalsoonaantooda, iyo dhisidda xiriirka ka dhexeeya mujtamacyada ay aad u saamaysay cabsidu.

Ma ku arki doona saraakiisha TAVIS xaafaddaayada?

- TAVIS waa mashruuc si guud uga socda magaalada oo dhan, waxaana aad ku arki kartaa xaafad kasta oo ka mid ah magaalada Toronto oo ay la soo deristay kor u kac hawlaha denbiyada abuura, cabsida saraakiil booliis ah oo loo qoondeeyey TAVIS.

Waa maxay hawlagal xaafadeedka TAVIS?

- Sannadka saddexaad, xilliga bilaha kulaylaha, saraakiil dheeraad ah oo TAVIS ah ayaa loo qoondeeyndoonaa xaafadaha ay la soo deristay cabsi heer adag gartay. Xilligan kulaylaha, aagga Albion-Finch ee saldhigga Booliiska 23aad, aagga Jane-Finch ee saldhigga Booliiska ee 31aad iyo aagga xaafadda Scarbrough ee saldhigga 43aad ayaa la doortay.
- Xaafadahaas waxaa loo doortay ayadoo la isticmaalayo qiimayn xad denbiyeedka xafadahaas, khariidadayn aagagga la danaynayo, la tashi mujtamaca. Sababta aagaggaas loo doortay waxaa weeye, waxaa la soo deristay hawl denbiyeed heer sare ah oo aad awoodooda uga weeyn.

Si aad wax badan uga baratid TAVIS, telefoonkan kala xiriir xarun kasta ee Adeegga Booliiska Toronto 416-808-2222,

ama

Saajin Jeff Pearson, xiriiriyaha Adeegga Booliiska ee Toronto ee TAVIS, 416-808-7736
Brendan Nolan, Magaalada Toronto, Horumarinta Bulshada, Dhaqaalaha iyo Maamulka, 416-392-5398
Jeff Ferrier, Guriyeenta Mujtamaca Toronto, 416-981-4252



Somali translated version